# Sticmaalka erayo mustaqbalka wax ka sheegaya

Guga roob baa *di,i doona*

Beerahaa *bixi doona.*

Cuntadaa badan doonta.

Aroorta goor hore ayaan *toosi doonaa.*

Haddii uu Axmed dedaalo. imtixaanka wuu ku *guulay-san doonaa.*

Barayaashiisuna way. ammaani doonaan. waalidkiisuna *way jeclaan doonaan*. Waana ay ku *faani doonaan*

Aamini dugsiga goor hore, ayay *tegi doontaa.*

saynab habeen dambe aad bay af soomaaliga *u akhri-san doontaa.*




Foto: Gerd Altmann /Pixabay

LAYLIS

I. Weydiino:

l. Berri.maxaad sameyn doontaa?

2. Fasaxa xaggee baad tegi doontaa?.

3 Galabta xaggee baad tegi doontaa?

4. Galabta maxaad ciyaari doontaa?

5. Berrito dugsiga immisada ayaad iman doontaa?

II. Ereyada hoos ku qoran ku buuxi meelaha banaan:

Doonaa, doontaa, doontaan, doonaan.

1. Axmed berrito wuu iman…

2. Caawa Caashi waa ay ciyaari…

5. Adigu galabta waa aad seexan…

4. Iyagu mar.dhaw bay tegi…

5. Annagu berrito waannu nasan…

6. Idinku shah baad cabbi…

III. Ereydan weero geli:

Qaday, faan, habeen dambe, mardhaw, ammaan.